

Sharci 19 febaraayo 1958, lamba. 9

Dhismaha Maxkamadda Degmada.

MAAMULAH

Markuu arkay oggoolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GODDOOMIYEY SOONA SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa la dhisay Maxkamadda Degmada, oo ka kooban hal garsoore kaliya, xarunna ku leh magaalo madaxda Degmada.

Waxa ay góaan ka gaaraysaa wixii la xiriira maadada jinaiga ah, waxayna ikhtisaas u leedahay in ay gasho dacwadaha ku saabsan faldembiyeedyada lagu casaarayo ciqaab xarig ah oo aan ka surreyn ugu badnaan saddex sano ama ciqaab ganaax lacageed ah, oo kaliya ama loo raaciyo tan xarigga ah, cid kasta oo gasha (ku kacda faldembiyeedyadaas).

Waxay kaloo ikhtisaas u leedahay in ay gasho (qaaddo):

- a) — Dembiga ah dagaal laba saflaha ah oo ku cad bilowga qdobka 588, ee Xeerka Ciqaabta, ayada oo loo shardinayo in dagaalkaas laba-saflaha ah aysan ka imaan dil ama dhaawacyo shakhsi o oculus ama aad u culus;
- b) — dhammaan dembiyada (faldembiyeedyada) uu dhigayo madaxa 2aad, ee cinwaanka 9aad, Buugga 2aad, ee Xeerka Ciqaabta, oo ku saabsan dembiyada lidka ku ah anshaxa iyo sharafka galmaada.

Qod. 2

Garsoorayaasha Maxkamadda Degmada waxaa laga soo saaraya muwaadiniin soomaali, lagu soo xulay tartan ku saleysan shahaadooyin iyo imtixaan oo loo iclaamiyey dad soomaali ah oo dhigtay koorisyo mucayin ah kuna gudbi gudbay imtixaanka qoraalka ah.

Marka la joogo dabbaqaadda kowaad, ee Sharcigan, garsoorayaasha degmada (Maxkmadda Degmada) waxaa laga soo saari karaa garsoorayaasha hadda jira oo soomaalida ah oo ay caddaatay in ay u qalma kaddib tartan xah shahaadooyin iyo imtixaan oo uu iclaamiyey Wasiirka Caddaaladda.

Inta la suaayo in dhammaan hanta xarumaha Garsoorayaal Degmo, xilalka waxaa lagu aamini kara (dhiibi karaa) dad u qalma (kafaaá u leh) oo loo dhiibo hawshaas.

Qod. 3

Dacwooyinka hor-yaal Garsooraha Degmada waxaa loo wado sí waafaqsan xeerarka habka oo uu qeexayo qdobka 15aad, ee Nidaamka garsoorka.

Qod. 4

Lidka xukunnada Maxkamadda Degmada (Garsooraha Maxkamadda Degmada) waxa ka furan oo la oggol yahay in racfaan looga qaato Maxkamadda Gobolka.

Lidka xukunnada uu Garsooraha Gobolka kaga dhawaaqo derejada racfaanka waxaa ka furan in cabasho looga qaato Maxkamadda Caddaaladda, sida ay qabaan axkaamta sharci.

Qod. 5

Haddii ay dhacdo, maqnaansho, laáanta ama caqabad, Garsooraha Degmada waxaa beddelaya, ayada lagu soo saarayo Xeerka Garsooraha Gobolka (Maxkamadda Gobolka), Garsoore Degmo oo kale, ee Gobolka.

Qod. 6

Qodobka 1aad, ee Nidaamka Garsoorka, waxaa loo beddelay sidaan: “Caddaaladda Dhulka waxaa maamulaya:

- 1) Qaalliga;
- 2) Maxkamadda Qaalliga;
- 3) Garsooraha Degmada (Maxkamadda Degmada);
- 4) Garsooraha Gobolka (Maxkamadda Gobolka);
- 5) Garsooraha Racfaanka;
- 6) Maxkamadda Tashiga;
- 7) Maxkamadda Tashiga, ee Racfaanka;
- 8) Maxkamadda Caddaaladda.

Qod. 7

Xeer kastoo kale, ee Nidaamka Garsoorka, oo ku jeheysan in uu nidaamiyo ikhtisaaska qaalliyaasha, Maxkamadaha Qaalliyaasha iyo Garsooraha Gobolka, xagga maadada jinaaiga, waxaa loo beddelay sí la jaanqaadi karta axkaamta Sharcigan.

Qod. 8

Cxukuumadda waxaa loo wakiishay in Xeerar ay ayadu leedahay ku soo saarto Xeerarka taabbagelinta iyo isuduwidda oo lagama maarmaanka u ah fulinta Sharcigan.

Qod. 9

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaan maalinta boqolaad ee xigta nashrintiisa lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa la gelinayaan Ururinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaan Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Taariikhda Muqdisho maanta oo ah 19 febaraayo 1958.

**Maamulaha
Anzilotti**

Wasiirka Kowaad

Iyo Wasiirka Caddaaladda

Cabdullahi Ciise Maxamuud